Warbixin ku socota dadka gelaya imtixaanka af-noorwiijiga, cilmiga bulshada iyo imtixaanka dhalasho waddan qaadasha

Imaatinka: Waa in aad waqtigii laguu sheegay timaadaa imtixaanka. Qofka yimaada iyadoo imtixaankii la bilaabay, waa loo diidayaa in uu galo. Eeg warbixinta ku saabsan saacadda iyo goobta la imanayo ee ku qoran goobta imtixaanka lagu qaadayo.

Aqoonsi: Waa in aad wadataa aqoonsi sharci ah, waana in aad saxiixdaa liistada dadka gelaya imtixaanka marka aad timaado goobta imtixaanka. Aqoonsiga la aqbalayaa waa:

- Baasaboor sharci ah
- Liisanka wadidda gaadhiga Norway – asal ama koobi
- Kaadhka bangiga Norway oo sawir leh
- Kaadhka Aqoonisga ee Boostada ee soo baxay ka dib 1dii abril, 2003
- Kaadhka Aqoonsiga Qaranka ee ay soo saareen wadamada EØS gudahoodu
- Dukumentiga safarka ee qaxootiga iyo baasaboorka ajaanibta
- Kaadhka degenaanshaha (oppholdskort) ee ajaanibta
- Warqadda Aqoonsiga qaxootinimo oo uu ku yaal magaca iyo goobta dhalashadu

Magaca: Marka aad saiixdo liistada dadka gelaya imtixaanka, waa in aad hubisaa in magaca, cinwaanka guriga iyo Aqoonsi-lanbarka si sax ah loo qoray.

Rasiidka: Haddii aad ku bixisay kharashka imtixaanka qaansheeg/faktura ama si toos ah aad ugu dirtay goobta imtixaanka, waa in aad wadataa rasiidka marka aad imtixaanka galayso.

Xanuun/jirro: Haddii aad xanuunsato, waa in aad u soo dirto ama aad keento caddayn dhakhtar ama caddayn fasax xanuun (sykemelding) goobta imtixaanka ugu danbayn toddoba (7) maalmood ka dib maalinta imtixaanka. Markaa waxa aad isu diiwaangelin kartaa imtixaan cusub oo aanad lacag bixinayn in aad gasho mar danbe.

Qalabka wax lagu qoro: Qalabka wax lagu qoro oo kuu gaar ah waa in aanad waxba ku qorin, laakiin waxa lagu siinayaa qalin iyo waraaq haddii aad rabto. Warqadda waa in aad soo xeraysaa ka hor inta aanad ka bixin goobta.

Moobiiltelefoon: Moobiiltelefoonka waa in aad gebi ahaan ba demisaa oo aad iska dhigtaa meel shishe inta aad imtixaanka ku jirto. Kuma haysan kartid jeebka ama goobta aad fadhido. Haddii qof lagu qabto moobiilkiisa isaga oo haysta imtixaanka inta lagu jiro, waxa loo arkayaa in uu isku dayey qish.

Qalab-kaalmaysi: Wax qalab-kaalmaysi ah lama oggola waqtiga imtixaanka lagu jiro. Macnaheedu waa ma isticmaali kartid internetka ama qoraalo lagu kaydiyey kombiyuutarka. Dadka kale lama hadli kartid aan ka ahayn qofka waardiyaha ama hogaamiyayaasha imtixaanka marka imtixaanka lagu gudo jiro. Isticmaalka internetka ama qoraalo lagu kaydiyey kombiyuutarka waxa lagu tirinayaa qish.

Qish: Ma isticmaali kartid wax qalab-kaalmaysi ah marka aad imtixaanka ku jirto. Isticmaalka qalab-kaalmaysi ama isku daygiisaba waxa lagu tiriyaa qish.

Tusaalayaal qish wuxu noqon karaa

- Isticmaalka qalab-kaalmaysi elektorooni ama telefoonka moobiilka
- Isticmaalka borogaraamada kale ee kombiyuutarka ee aan ahayn ka imtixaanka lagu qaadayo (tusaale ahaan Word, Notisblokk)
- Minguurinta (koobiyeynta) jawaab dhan ama qaybo ka mid ah oo dad kale lahaa
- Isticmaalka Aqoonsi aan sax ahayn
- Isticmaalka qaamuuska/dhikshineeri ama qoraallo aad soo qaadatay
- La xidhiidhka dadka kale ee aan ka ahayn shaqaalaha goobta imtixaanka marka imtixaanka lagu gudo jiro

Qish ama isku day qish, wuxu keenayaa in:

- lagaa eryo goobta imtixaanka
- aanad helin shahaadada imtixaanka innaba qaybo-imtixaanadii aad qaadatay xilliga imtixaankan aad qaadatay (waxa ay qusaysaa imtixaanka qoraalka iyo ka afkaba)
- waa in aad sugtaa imtixaanka danbe ee la qaadyo ka hor inta aanad imtixaan cusub gelin
- waa in aad bixisaa qarashka imtixaanka marka aad imtixaanka dib u galayso

Qishka waxa lagu oggaan karaa marka imtixaanka lagu jiro, imtixaanka ka dib ama marka la eegayo jawaabaha.

Qish min-guurin: Qoraalada aad ku qorayso qayb-imtixaanka qoraalka ah waa in ay ahaadaan mid aad adigu leedahay curintooda. Qish min-guurin ah lama oggola. Haddii markaa aad adeegsatay dhammaan ama qaybo qoraal dad kale (tusaale ahaan xagga internetka, buugta waxbarashada ama ardaydiinna ba) ka dibna aad ka dhigto in aad adigu qortay, waxa loo qiimaynayaa taas qish min-guurin ah, lama na qiimaynayo qayb-imtixaaneedkaas.

Foojari-garaynta shahaadad imtixaan: Foojari-garaynta shahaadad imtixaan waxa lagu tiriyaa been-abuur dukumenti oo booliiska ayaa dacwad loo gudbinayaa.

Shahaadada imtixaan: Goobta imtixaanka ayaa ku diraysa shahaadada imtixaanka cinwaanka guriga ee ugu qoran qofka liistada imtixaanka. Waa in aad wargelisaa goobta imtixaanka haddii aad heshay cinwaanguri oo cusub.

Xuquuqda cabashada: Ka cabasho natiijo: Xaq ayaad u leedahay in aad ka cabato natiijada qayb-imtixaaneedka ee qoraalka ah (Imtixaanka afnoorwiijiga). Muddada in aad ka dacwootaa ku eg tahay waa saddex usbuuc ka dib markii imtixaanka la saxay.

Ka dacwoodka khalad rasmi ah sida imtixaanka loo qaaday: Waa aad ka dacwoon kartaa khalad rasmi ah oo dhacay markii la qaadayey imtixaanka cilmiga bulshada, imtixaanka noowiiji ee afka ah iyo qayb-imtixaaneedka fahamka akhriska, fahamka dhegaysiga iyo wixii qoraal lagu gudbinayo. Muddada kama danbaysta ah ee ka

dacwoodku waa saddex usbuuc ka dib marka imtixaanka la galo. Eeg www.norskprøven.no iyo www.samfunnskunnskapsprøven.no .

Ka hor inta aan imtixaanku bilaabmin, waxa aad fursad u leedahay in aad wixii su'aal wax ku ool ah aad soo waydiiso (masuuliyiinta). Haddii aanad fahmin sua'aalaha qayb-imtixaaneedka qoraalka lagu soo gudbiyey waxa aad weydiin kartaa hoggaamiyaha imtixaanka.